



Fasalka 2016

Liiska Hubinta Sharuudaha Qalinjebinta

Magaca ardayga: _____

Liiskaan warbixinta shuruudaha qalinjebinta waxa loogu talagalay ardayda Fasalka 2016 (ardayda gashay fasalka 9aad sannad dugsiyeedka 2012-13). Si uu u helo diblooma, ardaygu waa inuu gudbo imtixaanada gobolka ee Farshaxannada Luuqadda Ingiriisida iyo Xisaabta. Shuruudo dheeraad ah ayaa hoos ku taxan. Qaybta “Dhibcaha Dugsiga Sare” waxay ku xidhan tahay shuruudaha deegaanka.

Ardayda aan buuxin heerka qiimaynaha gobolka ee caadiga ah ee looga baahan yahay qalinjebinta waxa dhici karta inay isticmaalaan beddello gobolku oggol yahay oo ku yaala bogga 2 ee dokumentigan, iyada oo ku xidhan mutaysiga.

Haddii uu ardayd helo **adeegyada waxbarashada gaarka ah**, kooxda Barnaamijka Waxbarasho ee la Gaar Yeelay (IEP) ayaa hagta go'aanka kaasi oo qiimaynaha ama beddellada gobolku ay habboon yihiin si loo oofiyo shuruudaha qiimaynta qalinjebinta (fadlan fiiri “Waxbarashada Gaarka ah iyo Imtixaanista Gobolka” www.k12.wa.us/Resources).

Ardayda u **beddesho** dugsiyada dadwaynaha Washington waxa dhici karta inay buuxiyeen shuruudaha imtixaanista ee gobol kale, ama dalban karaan galaangal u yeeladka beddellada qiimaynta qalinjebinta isaga oon marka hore isku dayin qiimaynaha gobolka.

Ka doono la-taliyaha dugsigaaga macluumaad dheeraad ah.

SHAQEYSO SAACADAH DUGSIGA SARE:

Fiiri [Xeerka Maamul ee Washington \(WAC\) 180-51-067](http://www.k12.wa.us/180-51-067) si aad tafaasiil uga hesho

Ingiriisi Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Xisaab Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Saynis Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Cilmiga bulshada Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Fanka Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Caafimaadka & Dhisnaanta Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Luuqadaha Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Waxbarashada Shaqeed Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Koorsooyinka La Doorto Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

Kale: _____

_____ Loo baahan yahay _____ Kasbaday _____

IMTIXAANADA GOBOLKA:

Ka fiiri bogga 2 tafaasiil

Fanka Luuqadda Ingiriisiga Gudbay

Xisaab Gudbay

QORSHAHA DUGSIGA SARE IYO KADDIB:

Loogu talagalay inuu ardayda ka caawiyo inay si caadi ah uga fekeraan mustaqbalkooda oo ay doortaan koorso sida ugu fiican ugu diyaarinaysa ahdaaftooda wixii ka dambeeya dugsiga sare, la abuuray iyada oo la kaashnayo waalidiinta/wakiilada iyo shaqaalaha dugsiga.

Dhammaystir

Fasalka Sharuudaha Imtixaanka Gobolka 2016

FANKA LUQADDA INGIRIISIGA	XISAAB
Shardiga fanka luqadda Ingiriisiga (ELA) waxaa la kulmay (dooro hal):	Shardiga Xisaabta waxaa la kulmay (dooro hal):
Gudubka Imtixanaadka Aqoonta Akhriska iyo Qorista Dugsiga Sare (HSPEs).*	Gudubka hal imtixaanka Dhamaadka Koorsada Xisaabta (EOC) ama imtixaanka ka-bixidda EOC.**
Keenista ugu yaraan 2548 imtixaanka Smarter Balanced ELA.	Kee ugu yar 2595 imtixaanka Smarter Balanced Xisaabta.
Keenista Heerka 2 (Aasaasi) ee Akhriska & Qorista HSPEs ama buundada heerka CIA imtixaanka Smarter Balanced ELA*** (ku xadidan ardayda helaya waxbarashada gaarka ah, marka la eego kooxda IEP).+	Keenista Heerka 2 (Aasaasi) hal imtixaanka Xisaabta EOC ama imtixaanka bixista EOC,** ama buundada heerka CIA ee imtixaanka Smarter Balanced Xisaabta*** (ku xadidan ardayda helaya waxbarashada gaarka ah, Halkii koox IEP).+
Gudubka Qorshaha Siistemka Imtixaanka Kale ELA Washington (ELA Washington Alternate Assessment System) (WAAS) Portfolio ama Washington-Helitaanka Tababarka iyo Cabbirka (Washington-Access to Instruction and Measurement) (WA-AIM) (ku kooban ardayda ku adag tahay fahamka, halkii koox IEP).+	Gudubka Qorshaha Siistemka Imtixaanka Kale Xisaabta Washington (WAAS) ama Washington-Helitaanka Tababarka iyo Cabbirka (WA-AIM) (ku kooban ardayda ku adag tahay fahamka, halkii koox IEP).+
Isticmaalka fursadda Isbarbar Dhigga Darajooyinka (Grades Comparison).**	Isticmaalka fursadda Isbarbar Dhigga Darajooyinka (Grades Comparison).**
In la keeno buundada 3 ama ka badan mid ka mid ah imtixanaadka AP ama 4 ama ka badan mid ka mid ah imtixanaadka IB loo ogolaaday ELA.**	In la keeno buundada 3 ama ka badan mid ka mid ah imtixanaadka AP ama 4 ama ka badan mid ka mid ah imtixanaadka IB loo ogolaaday Xisaabta.**
In la shaqeysto buundo sare imtixaanka SAT ama ACT xagga Akhriska, ama SAT ama ACT Plus Qoraalka xagga Qorista.**	Qaadashada buundo sare imtixaanka SAT ama ACT xagga Xisaabta.**
In la gudbo ELA Aruurinta Caddeynta (COE).**	Pagpasa sa Collection of Evidence (COE) sa Matematika.**
Gudbista qiimaynta caadiga ka hoosaysa ee ELA (ku xaddidan fasallada 11aad iyo 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, halkii koox IEP).+	Pagpasa sa off-grade level na pagtatasa sa Matematika (limitado sa mga mag-aaral sa ika-11 at ika-12 baitang na nakakatanggap ng espesyal na edukasyon, sa bawat pangkat ng IEP).+
Gudbista Qiimaynta Deegaanka lagu Go'aamiyey (LDA) ee ELA (ku xaddidan fasallada 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, halkii koox IEP).+	Gudbista Qiimaynta Deegaanka lagu Go'aamiyey (LDA) ee Xisaabta (ku xaddidan fasallada 12aad ee helaya waxbarashada gaarka ah, marka la eego kooxda IEP).+
Ardayda raacda dibloomada iyaga oo aan gudbin imtixaanka ELA gobolka Washington, waxaa shardiga ka dhaafay (dooro hal):	Ardayda raacda dibloomada iyaga oo aan gudbin imtixaanka Xisaabta gobolka Washington, shardiga waxaa ka dhaafay (dooro hal):
In la gudbo imtixaanka Akhriska dugsiga sare ay OSPI-ogolaatay ama imtixaanka ELA ee gobol kale.#	In la gudbo imtixaanka Xisaabta dugsiga sare ay OSPI-ogolaatay gobol kale.#
In racfaan laga qaato shardiga imtixaanka ELA loona gudbiyo gobolka maxaa yeelay waxaa jira xaalad khaas ah.##	In racfaan laga qaato shardiga imtixaanka Xisaabta loona gudbiyo gobolka maxaa yeelay waxaa jira xaalad khaas ah.##

* Akhriska iyo Qorista HSPEs waxa heli doona fasallada 12aad dayrta 2015 iyo gu'ga 2016.

** Imtixanaadka EOC waxay ku saleysan yahiiin Heerarka Waxbarashada Gobolka Washington ee hore (Washington State Learning Standards) xagga xisaabta. Imtixanaadka ka-bixidda EOC waxay ku saleysan yahiiin Gobolka Washington ee la casriyeyay Heerarka Waxbarashada (Maadooyinka Muhiimka ah), laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2014–15.

*** Buundooyinka looga baahan yahay ardaydu inay kasbadaan Shahaadada Kasbashada Shaxsigu (CIA) lama go'aamin ilaa Ogosto 2015. Buundooyinka waxa lagu dhawaaqi doonaa Noofambar 2015.

+ Go'aanka ku saabsan sida arday loo ogolyahay uga qeybgalo imtixaanka goboka oo idil waa [Barnaamij Waxbarasho ku Kooban Qofka \(Individualized Education Program\) \(IEP\) go'aanka kooxda](#), ma aha go'aanka maamulka.

** Ilaa arday u gudbay dugsiyada dadweynaha Washington ee fasalka 11aad ama 12aad waa inay isku dayo qiimaynaha gobolka halmar kahor u qalmista beddellada meel kasta waxa dhiganayo (www.k12.wa.us/assessment/GraduationAlternatives).

Waa in uu ku soo wareegay dugsiyada dadweynaha Washington kana soo wareegay dugsi kale oo ku yaal gobolka ama dugsi gaar loo leeyahay.

Waa in uu ku jiro darajada 12 lana kulmo aad hab kooban oo ku taxan [Koodka Maamulka Washington \(Washington Administrative Code\) \(WAC\) 392-501-601](#) si loo hirgeliyo.

Fasalka Sharuudaha Imtixaanka Gobolka 2016

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Ardaydu waa inay buuxiyaan dhawr kamid ah shuruudaha qalinjabinta gobolka iyo deegaanka si ay ku kasbadaan dibloomada dugsiga sare. **Bogga 1 ee dokumentigan waxa ku qoran liis warbixin ee shuruudaha imtixaanista. Bogga 2 wuxuu caddaynayaa ikhtiyaarada imtixaanista ee jira si loo oofiyo shuruudaha.**

Hoos waxa ku qoran jawaabaha qaar kamid ah su'aalaha badanaa la iswaydiiyo ee kusaabsan imtixaanada gobolka. Macluumaad dheeraad, fadlan la xidhiidh la-taliyaha dugsigaaga ama booqo www.k12.wa.us/GraduationRequirements.

Waa maxay shuruudda qalinjabinta imtixaanista gobolka dugsiga sare ee Fasalka 2016?

Ardaydu waa inay buuxiyaan heerka farshaxannada luuqadda Ingiriisida (ELA) iyo xisaabta si ay u mutaystaan qalinjabinta. Ka fiiri bogga 2 ee dokumentigan imtixaanada iyo beddellada.

Ma jiraan ikhtiyaaro loogu talagalay ardayda mutaysatay adeegyada waxbarashada gaarka ah haddii imtixaanada gobolku aanu ku habboonayn?

Kooxaha Qorshaha Waxbarasho ee la Gaar Yeelay (IEP) waxay go'aamiyaan beddellada la oggol yahay ee ardayda helaya adeegyada waxbarashada gaarka ah ay isticmaali karaan si ay u oofiyaan shuruudaha qiimaynta qalinjabinta.

Degmadu waxay leedahay dariiqooyin u oggolaanaya ardayda mutaysatay waxbarashada gaarka ah in laga dhaafo shuruudaha koorso ama buundo marka uu jiro xidhiidh toos ah oo u dhexeeya ku hoobashada buuxinta shuruudaha koorsoada ama buundada iyo naafada ardayga (fiiri WAC 180-51-115).

Goorma ayey natiijooyinka imtixaanka dugsiga sare la soo celinayaa?

- **Imtixaanka u Diyaarinta Kulliyadda iyo Shaqada (Smarter Balanced):** Dhawr toddobaad gudahood marka ardaydu dhammaynayaan imtixaanka
- **HSPE:** Juunyo
- **EOC:** Sateembar
- **WA-AIM:** Juunyo

Goorma ayaan gali karaa imtixaan gobol oo aanan gudbin?

- **Imtixaanka u Diyaarinta Kulliyadda iyo Shaqada (Smarter Balanced):** Noofambar iyo Maarso-Juunyo
- **HSPE:** Noofambar iyo Maarso
- **EOC:** Janaayo-Februaayo iyo Maayo-Juunyo
- **WA-AIM:** Sibtambar-Noofambar iyo Oktoobar-Abriil

Imtixaanada kale ee loo isticmaali karo beddello qiimaynta qalinjabinta, sida SAT, ACT, AP, iyo IB, waxay leeyihiin wakhtiyo ay u sameeyeen ururrada bixiyaa. Gobolku qayb kama ah jadwalladan imtixaanista.

Maxaa dhacaya haddii aanan buuxin shuruudaha qalinjabinta qiimayntayda, laakiin aan gudbay shuruudahayga kale oo dhan?

Kasban maysid diblooma. Gudbista imtixaanada gobolka ama beddelladu waa shuruud qalinjabin, ilaa lagu dhaafay xaaladaha *aadka* u xaddidan (ka doono la-taliyaha dugsigaaga macluumaad dheeraad ah).

Haddii aanan gudbin imtixaanadayda gobolka oo ama fasallada la rabay oo dhan, wali ma awoodaa inaan la socdo fasalkayga qalinjabinta?

Degmo dugsiiyeyda deegaanku waxay leeyihiin siyaasado sheegaya cidda kaqaybqaadanaysa xafladaha qalinjabinta.

Ma qaadan karaa mid kamid ah beddellada qiimaynta, sida ururinta caddaynta ama SAT, halkii qaadashada imtixaanada gobolka?

Maya *halkii* imtixaanada gobolka, laakiin fursad dheeraad ah ahaan haddii *aanad guulaysan* imtixaanada gobolka. Ardaydu waa inay isku dayaan imtixaan kasta oo gobolka ah ugu yaraan halmar kahor galaangal u yeeladka beddellada gobolku oggol yahay.

Hase yeeshee, haddii arday loo beddello dugsiyada dadwaynaha Washington ee fasalka 11aad ama 12aad, shuruudo kale ayey dhici kartaa inay u oggolaadaan ardaygu inuu galaangal u yeesho beddellada qalinjabinta isaga oon marka hore isku dayin qiimaynta gobolka.

Imisa buundo ayaan u baahanahay si aan u qalinjabiyoo?

Gobolku wuxuu u baahan yahay ugu yaraan 20 buundo, ([Xeerka Maamul ee Washington \(WAC\) 180-51-067](http://Xeerka Maamul ee Washington (WAC) 180-51-067)); degmo dugsiiyeyda badankoodu waxay u baahan yahay wax ka badan. **Waa inaad buuxiso shuruudaha degmada deegaankaaga si aad u qalinjabiso.** Fadlan ka hubi dugsigaaga si aad u ogaado shuruudahaaga qalinjabinta ee dhacda ah.

Haddii aan gudbo dhammaan buundooyinka gobolku u baahan yahya, ma kasban karaa dibloomada gobolka?

Ma jirto diblooma gobol. Degmo dugsiiyeyda deegaanka ayaa bixiya dibloomada.

Maxaa ii bannaan haddii aanan ku qalinjabin wakhtiga loogu talagalay?

- **Sii joog dugsigaaga sare.** Waxbarashada dadwaynaha K-12 waa bilaash ilaa 21 jirka.
- **Isku qoraan Barnaamijka Dhamaystirka Dugsiga Sare Kulliyadda Bulshada iyo Farsamada (Community and Technical College High School Completion Program).** Barnaamijyadan waa lacag haddii aad u dhaxayso 16 iyo 18 jir. Haddii aad tahay 19 ama ka wayn, kuuliyadaha waxa u bannaan inay kaa dhaafaan lacagta waxbarashada. Hubi haddii kuuliyadda aad rabto inaad dhigato ay bixiso barnaamijka dhammaysashada dugsiga sare.
- **Ka bilaw koorsooyinka kuuliyadda bulshada ama farsameed bilaa dibloomada dugsiga sare.**
- **Raac Shahaadada La Midka ah Dugsiga Sare.** Shahaado ayaa la kasbadaa kadib gudbista imtixaan isku daba xiga. Ardayda ka yar 19 jir waa inay fasax ka haystaan dugsigooda sare si ay uga qaybqaataan barnaamijka u dhignaanta dugsiga sare.